THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR

Franklin County BOARD OF COMMISSIONERS 1803

## Columbus-Degmada Franklin

# Maalgelinta Kabashada Ganacsiga Yar



## MAXAY

Waxa jira $8 malyan oo maalgelin deeqeed ah oo loo qaybin doono ganacsiyada yaryar ee Columbus iyo Degmada Franklin kuwaas oo buuxiya tilmaamaha deeqda si guul lehna u dhamaystira hannaanka codsiga.

Deeqaha waxa loogu talagalay in lagu taageero ganacsiyada yaryar ee ku yaalla Magaalada Columbus ama Degmada Franklin ee sida taban uu u saameeyey safmarka COVID-19, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda bulshooyinka la faquuqo iyo/ama ganacsiyada ay leeyihiin bulshooyinka laga tirada badan yahay, ganacsiyada ay leeyihiin dadka dhaqaale ahaan liita iyo ganacsiyada ay leeyihiin dadka ciidamada hore uga tirsanaan jirey.

Waxa jira saddex heer oo deeqo ah oo lagu heli karo Maalgelinta Kabashada Ganacsiyada Yaryar ee Columbus-Degmada Franklin.

**Deeqaha Soo Kabashada ee $5,000.**
Diyaar u ah is shaqaaleysiiyeyaasha, hay'adda qofka kelida ahi ka shaqeeyo, mulkiilayaasha kelida ah ama shirkadaha masuuliyadoodu ku xaddidan tahay hal xubin ee aan lahayn shaqaale W2 leh.

**Deeqaha Soo Kabashada ee $10,000.**
Diyaar u ah mulkiilayaasha ganacsiyada yaryar kuwaas oo imika ahaan ay u shaqeeyaan ugu yaraan hal (1) shaqaale oo W2 leh oo wakhti dhamaystiran ah, ama cid u dhiganta oo wakhti dhamaystiran ah, oo uu dheer yahay mulkiiluhu.

**Deeqo Shaqo Soo Celin oo +Ka Badan $10,000.**
Ayaa diyaar u ah mulkiilayaasha gacansiyada u qalma Deeqda $10,000 ah oo muujin kara khasaare shaqaale oo uu keenay safmarku. Mulkiilayaashani sidoo kale waxa ay Deeqda +Ka Badan $10,000 ugu qalmi karaan $10,000 oo kale si ay dib ugu shaqaalaysiiyaan hal (1) shaqaale oo W2 leh oo wakhti dhamaystiran ah.

## WAKHTIGA

**Codsiyada waxa la furay Isniintii, Maarsho 7, 2022** waxana la aqbalayaa muddooyin uu wakhti u dhexeeyo, iyada oo la furayo lixdii toddobaadba mar **illaa Sabtida, Sibtambar 3, 2022**, ama illaa maalgelinta la bixiyo.

Ohio | Small Business Development Centers
Columbus State Community College

The Wells FOUNDATION

## SIFAHA

Mulkiilayaasha gacansiyadu waxa ay ka baran karaan wax dheeraad ah, ogaan karaan u qalmitaanka waxana ay ka codsan karaan deeq barta SmallBusinessRecoveryGrant.com.





## CIDDA

Magaalada Columbus iyo Degmada Franklin waa kafaale qaadayaasha Maalgelinta. Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yar ee Ohio ee Kuliyadda Bulshada ee Gobolka Columbus waa maareeyaha barnaamijka Maalgelinta ee kormeeraya codsiga deeqda Maalgelinta iyo hannaanka maalgelinta.

Mu'asassada Wellsayaa ah wakiilka xisaabeed iyo shuraakada tiknoolajiyeed ee Maalgeinta.

## SABABTA

Ganacsiyada yaryar waa aasaaska dhaqaalaha Bartamaha Ohio. Ujeedka barnaamijka deeqdu waa in la taageero dhaqaalaha ganacsiyada yaryar ee gobolka oo la xaqiijiyo in halabuurka ganacsiyeed uu hodmi karo oo uu kori karo.

**Barnaamijkani waxa uu doonayaa in uu gurmad siiyo ganacsiyada yaryar si uu uga caawiyo:**

- Joogteynta hawlgallada iyo sidoo kale shaqaalaha.
- Joogteynta habraacyada hawlgalka ee ammaanka ah.
- Yareynta dhibaatada dhaqaale ee ku timid khasaaraha iibka.
- Raadinta iyo ka faa'iidaysiga fursadaha korniinka ganacsiyeed.
- Siinta Maalgelin ganacsiyada yaryar si ay u shaqaalaysiiyaan oo tababaraan shaqaale cusub.
- Siinta maalgelin ay dib ugu shaqaalaysiiyaan boosaskii hore loo waayey.

**Taageero Ganacsiyeed oo Dheeraad ah:**

Iyada oo qayb ka ah hannaanka codsiga deeqda, mulkiilayaasha ganacsiga waxa lagu beegi doonaa Hay'ad Taageerada Halabuurka Ganacsiyeed ah (ESO) si ay uga caawiso hannaanka deeqda.

**Waxay yihiin**

- Aventi Enterprises
- Columbus Empowerment Corporation
- OB3 Advisory and Management LTD
- Sankofa Enterprises LLC
- SBC Small Business Consulting
- World Peaces
- YMT Consultants

**Marka laga yimaad liiska ESO yada ee sare, Shuraakooyinka Gaadhsiinta Bulshada Maalgelinta Soo Kabashadu waa:**

- Asian American Commerce Group
- Catholic Social Services – Our Lady of Guadalupe Center
- Columbus Urban League
- Ohio Minority Business Assistance Center
- Elevate Northland
- Greater Linden Business Network
- Hispanic Chamber of Columbus
- Social Ventures
- Somali American Chamber of Commerce
- The St. John Learning Center
- Urban Business Development Center

THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR

Franklin County BOARD OF COMMISSIONERS 1803

Ohio Small Business Development Centers
Columbus State Community College

The Wells FOUNDATION

THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR

Franklin County BOARD OF COMMISSIONERS 1803

Columbus-Franklin County

# Small Business Recovery Fund

**Sharaxaadda Codsadaha** ***=Waajib Aagga Macluumaadka**

***Magaca Koowaad:** ____________ ***Magaca Saddexaad:** ____________ **Ladhka:** ______

(Sharci) (Sharci)

***Cinwaanka Iimeylka:** ____________

Si aad ugu adeegsato dhammaan xidhiidhada la xidhiidha codsigan. Hubi in uu yahay iimeyl aad hubiso mar walba.

***Cinwaanka Sekedda Ganacsiga:** ____________

Lama ogola Sanduuqyo Xafiiska Boosta ah. Lambarka iyo magaca sekedda ayaa loo baahan yahay.

Ganacsiga guriga ku yaal waxa uu adeegsanayaa cinwaanka guriga.

***Magaalada:**
**Meel Kale:**

- ☐ Columbus
- ☐ Bexley
- ☐ Blacklick
- ☐ Canal Winchester
- ☐ Dublin
- ☐ Gahanna
- ☐ Grandview Heights
- ☐ Grove City
- ☐ Groveport
- ☐ Hilliard
- ☐ New Albany
- ☐ Pickerington
- ☐ Reynoldsburg
- ☐ Upper Arlington
- ☐ Westerville
- ☐ Whitehall
- ☐ Worthington
- ☐ Midna kuwa Sare

***Degmada** ☐ Degmada Franklin ☐ Meel kale

***Gobolka:** ☐ Ohio ☐ Meel kale ***Koodhka Boosta:** ____________

(Ku xaddid 5 xaraf)

***Kani ma yahay cinwaankaaga boosta?** ☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay tahay MAYA, fadlan ku sheeg cinwaankaaga boosta halka hoose. Sanduuqa P.O waa la aqbalayaa.

Cinwaanka Boosta Cinwaanka Sekedda ____________

Magaalada Cinwaanka Boosta ____________

Gobolka Cinwaanka Boosta ____________ Koodhka Boosta Cinwaanka Boosta ____________

***Lambarka** ____________ ***Nooca Lambarka** ☐ Lambarka Taleefanka Gacanta

FOR REFERENCE ONLY

Ohio Small Business Development Centers
Columbus State Community College

The Wells FOUNDATION

**Taleefanka** **Taleefanka** ☐ Lambarka Taleefanka Gacanta
☐ Lambarka Taleefanka Ganacsiga

Adeegso lambarka ugu wanaagsan ee lagaala soo xidhiidhi karo

## Codsiga Ganacsiga

(Codsaduhu waa in uu noqdo mulkiilaha ganacsiga inta ugu badan iska leh. Keliya hal mulkiile ayaa xareyn kara.)

***Nooca Hay'adda Ganacsi** (Ganacsiyada aan macaash doonka ahayni uma qalmaan Barnaamijkan)

☐ Mulkiyadda Kelida ah
☐ Shuraako
☐ Shirkad
☐ Shirkad -S ah
☐ Shirkad Masuuliyaddeedu Xaddidan Tahay (LLC)
☐ Shuraako Guud
☐ Shuraako Xaddidan
☐ Shuraako Masuuliyaddeedu Xaddidan Tahay (LLP)
☐ Shirkad aan Macaash Doon ahayn

***Ganacsigaagu ma ka diiwaangashan yahay Xoghaynta Gobolka Ohio?**

☐ Haa ☐ Maya Tani shardi uma aha codsig

***Magaca Sharciga ah ee Ganacsiga:** ____________________

Magaca Ganacsiga ee ka Diiwaangashan Gobolka Ohio ama Magaca uu ganacsigu ku hawlgalo, haddii aanu diiwaangashaneyn.

**Taariikhda Ganacsigu Bilaabmay:** ____________________

Taariikhda Bilawga waxa lagu xaddidi karaa markii aad bilawday sameynta iibka kaas oo loo sheegay ujeedooyin cashuureed awgood.

Fadlan u qaabee sida MM/DD/YYYY.) Haddii aad u baahan tahay caawimo geli 99/99/9999

***Ganacsigaagu ma adeegsadaa Lambar Aqoonsi Loo Shaqeeye (EIN)?**

☐ Haa ____________________ ☐ Maya ____________________

Haddii jawaabtu tahay haa, fadlan sheeg Lambarka Aqoonsiga Loo Shaqeeyaha (EIN)

Haddii jawaabtu tahay maya, fadlan sheeg # ka Sooshal Sekeyuuritigaaga

***Ganacsigaagu ma ku salaysan yahay hawlaha soo socda?** **Ganacsi u shaqeeya si caam ah** ☐ **Dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed ama olole** ☐ **Wakaalad Khamri oo Gobolka ah**

☐ Wakaalad Dawladeed
☐ Naadi leh xubinimo gaar ah
☐ Ganacsiga ku jihaysan dhanka galmada
☐ Iibka, beerashada, ama baahinta waxyaabaha ka samaysan xashiishadda "cannabis" marka laga reebo CBD
☐ Hay'ad dhaqaale oo samaysa deyman ama deyn siisa dadweynaha
☐ Midna kuwa Sare

FOR REFERENCE ONLY

***Nooca Ganacsiga**

☐ 23 Dhismaha
☐ 31 Warshadeynta
☐ 42 Ganacsi Jumlad Leh ah- ka iibinta alaab ama adeeg ganacsi
☐ 44 Ganacsi Tafaariiq ah - Ka iibinta alaab iyo adeeg macmiil
☐ 48 Rarista & Bakhaar Ku Haynta
☐ 51 Macluumaadka
☐ 52 Dhaqaalaha & Caymiska
☐ 53 Hantida Ma Guurtada ah
☐ 54 Adeegyada Xirfadeed, Sayniseed, & Farsameed
☐ 55 Maamulka Shirkadaha & Mu'asasadaha
☐ 56 Maamulka & Taageerada
☐ 61 Adeegyo Waxbarasho
☐ 62 Daryeel Caafimaad & Kaalmo Bulsheed
☐ 71 Fanka & Madadaallada
☐ 72 Adeegyada Deganaanshiyaha & Cuntada
☐ 81 Adeegyo Kale (marka laga reebo Maamulka Dadweynaha)

________________________________________

***Waa maxay Koodhkaaga NAICS?:**

☐ Waa aan garanayaa Koodhkayga NAICS __________________ ☐ Caawimo ayaan uga baahanahay tan

***Ma tahay Mu'asasad Ganacsi oo Bulshada Laga Tirada Badan Yahay Leedahay (MBE) oo shahaado ka haysata Gobolka Ohio ama Magaalada Columbus?** Tani shardi uma aha codsiga

☐ Gobolka Ohio oo Keliya ☐ Magaalada Columbus oo Keliya ☐ Gobolka & Magaalada Columbus
☐ Midna kuwa Sare

**Tirada Shaqaalaha W-2 ee Wakhtiga Dhamayska Tiran laga bilaabo Taariikhda** ☐ Ka Bood Su'aasha

☐ Ka sarreeya 25 ☐ 16 - 25 ☐ 11 - 15 ☐ 6 - 10 ☐ 2 - 5 ☐ 1 ☐ Midna

Ha ku darin Mulkiile(yaasha) Ganacsiga tiradan waxana aad u adeegsataa qaaciidada hoose shaqaalaha gellinka ah.

**Tirada Shaqaalaha Gellinka ah laga bilaabo Taariikhda Codsiga**

☐ Ka sarreeya 25 ☐ 16 - 25 ☐ 11 - 15 ☐ 6 - 10 ☐ 2 - 5 ☐ 1 ☐ Midna

2 Shaqaale Gellin ahi (PT) Waxa ay La Mid Noqon Doonaan 1 Shaqaale oo Wakhti Dhamaystiran ah (FT) iyada oo aan la tixgelinayn Saacadaha Gellinka ee hoos u duubista Maalgelintan

***Ganacsigaagu miyuu leeyahay xisaab shaqaynaya oo ganacsiyeed oo furan?**

☐ Haa ☐ Maya

Waxa lagaa dalban doonaa inaad yeelato xisaab shaqaynaya oo ganacsiyeed oo furan hal toddobaad gudihii marka lagu ogaysiiyo ansixinta deeqda si aad ugu hesho bixinta deeqda elegtaroonig ahaan Shuraakadaada Codsiga ee laguu qoondeeyey ayaa ku siin doona khayraadka.)

**Ma ku muujin kartaa hoos u dhaca iibka ee ganacsigaaga ee aad wajahday ee ah 25% ama ka badan ee uu sababay COVID-19 adiga oo adeegsanaya hababka hoose?** DOORO MID. Caddeyn ayaa loo baahan doonaa

☐ Haa, waxa aan isbarbardhigi doonaa bayaanada bangi ee ganacsiyeed (Abriil 2019 illaa Abriil 2020)
☐ Haa, waxa aan isbarbardhigi doonaa bayaanada bangi ee ganacsiyeed (Abriil 2020 illaa Abriil 2021)
☐ Haa, waxa aan isbarbardhigi doonaa cashuur celinta ganacsiga (Jadwalka C ama 1120 yada 2019 ka iyo 2020 ka)
☐ Haa, waxa aan isbarbardhigi doonaa cashuur celinta ganacsiga (Jadwalka C ama 1120 yada 2020 ka iyo 2021 ka)
☐ Haa, waxa aan isbarbardhigi doonaa xaaladda dhaqaale/ cashuur celinta sannadkii (Jadwalka C ama 1120 yada 2020 ka iyo Macaashkayga iyo Khasaarahayga sanadkii ee 2021 ka)
☐ Maya
☐ Waxa aan caawimo uga baahanahay ka jawaabista su'aashan
☐ Ka Bood Su'aasha

***Miyaa laguu diiday inaad hesho deyn ganacsiyeed 18 kii bilood ee la soo dhaafay?**

☐ Haa ☐ Maya

***Sidee maalgelintan loo adeegsan doonaa?** Calaamadi dhammaan inta ku habboon

FOR REFERENCE ONLY

□ Joogteynta hawlgallada
□ Haynta Shaqada Mulkiilaha
□ Haynta Shaqaalaha
□ Abuuritaanka Shaqo(oyin)
□ Dhaqangelinta habraacyo hawlgaleed oo ammaan badan
□ Yareynta dhibaatada/hoos u dhaca dhaqaale ee ku yimid iibka
□ Wax Ka Beddelada Goobta
□ Dib u soo celinta **(Haddii la doortay, waxa aad u gudubtaa su'aasha xigta. Haddii aan la dooran waxa aad u gudubtaa su'aasha Qowmiyadda)**

**Maalgelintan miyaa loo adeegsan doonaa in dib loogu soo celiyo ugu yaraan 1 shaqaale oo W-2 leh oo wakhti dhamaystiran ah oo cusub 2 bilood gudahood marka la helo maalgelinta, kaas oo aad awood u yeelan doonto**

□ Haa □ Maya □ Caawimo ayaan uga baahanahay tan, sharaxaad baan u baahanahay.

**Marka aad doorato "Haa" waxa aad u qalmi kartaa $10,000 oo deeq ah oo dheeraad ah. Diiwaanada mushaharada ayaa loo baahan doonaa si loo muujiyo caddeyn khasaare shaqaale ah oo uu sababay COVID-19 iyo in shaqaale cusub la shaqaaleysiiyey 2 bilood gudahood marka la helo maalgelinta oo la haystay muddo 4 bilood ah kadib.**

***Qowmiyadda:** **Qowmiyadda inta ugu badan lagugu aqoonsado**

□ Caddaan
□ Madaw
□ Eeshiyaan
□ Maraykan Dhalad ah/ Reer Alaska
□ Reer Hawai/ Reer Pacific

***Hispanic:** □ Haa □ Maya

**Xaaladda Muwaadinimo:**

□ Muwaadin Maraykan ah
□ Qaxooti/Magan
□ Degaan Joogto ah ama xaalad Ku Meelgaadh ah
□ Meel kale

***Jinsiga:** □ Lab □ Dheddig □ Waxaan doorbidayaa inaan □ Wax Jinsi ah lama xidhiidho

***Waxa aan ahay Bulshada LGBTIQ L+** □ Haa □ Maya

***Naafanimo:** □ Haa □ Maya

***Da'da:** **Wakhtiga codsiga**
□ Kayar 18 sano jir
□ 18 - 54 sano jir
□ Ka weyn ama ah 55

***Xaaladda Milatariga Maraykanka** (Calaamadi dhammaan inta habboon)
□ Midna
□ Ciidan Hore
□ Ciidan Hore oo Ku Naafoobay Shaqada Qaranka
□ Ku Jira Shaqada Ciidanka
□ Xubin Ka ah Ciidanka Ilaalada Qaranka
□ Xubin Ka ah Ciidamada Kaydka ah
□ Xaas u ah Xubin Milatari ah

***Sidee baad wax uga ogaatay Maalgelinta Soo Kabashada Ganacsiyada Yaryar ee COVID-19?**
□ Shuraako Bulsho
□ Maqaal war ah
□ Baraha Bulshada
□ Baadhis Internet
□ Saaxiib/cid aad wada shaqaysaan
□ Meel kale ______________________
□ HAY'ADDA TAAGEERADA HALABUURKA GANACSIYEED (ESO)

**Xuquuqda iyo Masuuliyadaha Macmiilka** Ka codsade Deeqda Barnaamijka Soo Kabashada Ganacsiyada Yaryar ee Degmada Columbus & Franklin ahaan waxa aad kala shaqayn doontaa Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Ohio (SBDC) buuxinta codsigaaga. Si ay kuu siiso kaalmada aad u baahan karto SBDC waxa ay kuu magacaabi doontaa macmiil ahaan. Iyada oo tan la eegayo waxa aanu jeclaan lahayn in aanu kugu la talino xuquuq iyo masuuliyado gaar ah oo aad leedahay ka mid kamid ah macaamiishayada ahaan:

Waxa aad xaq u leedahay inaad filato:

• Adeegyo la talin oo degdeg ah, xushmad leh, oo xirfadeed iyo in lagu la taliyo haddii Ohio SBDC ay awood u yeelan weydo inay adeeg kugu siiso wakhtiga loo baahan yahay. Waxa aad ka warqabtaa in dalabka adeegyadayada awgood, kiisaska inay tahay in mudnaan lagu kala siiyo baahida oo tababbar ayaa la soo jeedin karaa kahor inta aan la talinta la bixin.

FOR REFERENCE ONLY

• Dhammaan macluumaadka lala wadaagay Ohio SBDC iyo wax kamid ah khayraadkeeda (shaqaalaha, xubnaha waxdhigista ee hay'adda, mutadawiciinta, iyo la taliyeyaasha) waxa lagu hayn doonaa qarsoodinimada ugu adag. Wax macluumaad ah oo aad bixisay adigu uma adeegsan doono ka faa'iidaysi xayeysiis cid ah xubin shaqaale, la taliye, ama khayraad kale oo kamid ah Ohio SBDC ama in uu ugu faa'iideeyo dhinac saddexaad.

• In xaaladdaada macmiil ee aad la leedahay Ohio SBDC ay ahaan doonto qarsoodi. Wax adeegsi caam ah oo aqoonsiga magacaaga, cinwaankaaga, ama ganacsigaaga ah lama sameyn doono iyada oo aan la helin ogolaanshahaaga hore. Fadlan ogsoonow, si walba ha noqotee, in Ohio SBDC ay qayb ahaan maalgeliso Maamulka Ganacsiyada Yaryar ee Maraykanka, Wakaaladda Adeegyada Horumarinta ee Ohio iyo martigeliyaha maxalliga ah, macluumaadka macmiilka ee dhamayska tiran waxa la siiyaa oo keliya hay'adahaas.

Kaalintayadu waa in aanu la talino oo aanu kaalmayno mulkiilayaasha ganacsiyada yaryar iyo kuwa qorshaynaya inay galaan ganacsi. Kuuma sameyn doono go'aano ama xukuno ganacsiyeed adiga, sidaas oo ay tahay waxa aanu sameyn doonaa talooyin iyo soo jeedino hadba sida aanu ugu aragno munaasab. Kuwan waxa ay ku salaysnaan doonaan dedaaladayada ugu wanaagsan ee aanu ku dabaqayno khibradda iyo khayraadka aanu heli karno si aanu kaaga kaalmeyno inaad gaadho go'aanadaada ganacsiyeed.

Ohio SBDC waxa ay kusoo dallici kartaa fii macquul ah barnaamijyada tababarka, adeegyada gaarka ah, iyo daabacaadaha. Si walba ha noqotee, waxa aad xaq u leedahay inaad ammaan ka dareento in wax fii ah aanay Ohio SBDC ama khayraadkeedu ku soo dallaceyn adeegyada la talin ee caadiga ah ee lagu siiyo. Sidoo kale, wax soo jeedin ah lama samayn doono oo ku saabsan ka iibsiga alaabo ama adeegyo shakhsi ama shirkad kaas oo cid kamid ah shaqaalaha SBDC ama khayraadkeedu ay la leeyihiin wax dan dhaqaale, qoy ama shakhsiyeed ah.

Adeegyada la talin ee lagu siiyo waxa ay qayb ka yihiin dedaalka ay Ohio SBDC iyo kafaale qaadayaasheedu ugu jiraan inay ka jawaabaan baahiyaha koraya ee bulshada ganacsiyada yaryar iyo inay si togan u saameeyaan dhaqaalaha Ohio. Ujeedkoodu ma aha inay la tartamaan, beddelaan, ama beddel u noqdaan adeegyada laga heli karo waax gaar ah. Macaamiisha baahiyahooda si buuxda ay ugu dabooli karaan xirfadyahano ama shirkado waaxo gaar ah qaab la awoodi karo waxa lagu dhiirrigelin doonaa inay adeegsadaan khayraadkaas.

Iyada oo la tixgelinayo in Ohio SBDC ay ku siinayso kaalmo maamul iyo farsameed, waxa aad ogolaanaysaa inaad ka tanaasusho dhammaan cabashooyinka ka dhanka ah Ohio SBDC iyo mu'asasadaha ay ka kooban tahay, shaqaaleheeda, ama wixii khayraad kale ah ee la shaqaaleeyey ama la adeegsaday ee la xidhiidha adeegyadan. Waxa sidoo kale lagaa fili doonaa inaad kala shaqayso Ohio SBDC dedaalada ay ku xaqiijinayso tayada iyo wax ku oolnimada adeegyada la talinta ee ay bixiso.

Iyada oo tan la xidhiidha, Ohio SBDC waxa ay ka dalban doontaa dhammaan macaamiisha kuwaas oo hela kaalmo la talin inay buuxiyaan qiimeynta qoraalka ah ee adeegyada la bixiyey. Taas waxa dheer, macaamiishu waxa ay ka heli karaan wareysiyo toos ah xafiiskan, xafiiska Agaasimaha Gobolka Maamulka Ganacsiyada Yaryar ee Maraykanka kuwaas oo la xidhiidha adeegyada lagu siiyey. Jawaabaha aad ka bixiyo wareysiyadaas oo dhan waxa ay noqon doonaan kuwo aad loo qadariyo.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xidhiidha tan fadlan kala xidhiidh iimeylka SBDC@CSCC.edu.

**Heshiiska SBDC:**
Waxa aan ka codsanayaa adeeg la talin ganacsiyeed Ohio SBDC, Shuraako Khayraad oo Maamulka Ganacsiyada Yaryar ah (SBA).
Waxa aan ogolahay inaan iskaashi sameeyo haddii aan doorto inaan ka qaybqaato xog-ururinada loogu talagalay in lagu qiimeeyo adeegyada SBA.
Waxa aan u ogolahay Ohio SBDC inay u adeegsato magacayga iyo cinwaankayga xog-ururinada iyo boos ku dirista macluumaadka la xidhiidha alaabta iyo adeega.
Waxa aan fahansanahay in wixii macluumaad ah ee la bixiyo lagu hayn doono qarsoodinimo adag. SBDC ma siin doonto macluumaadkaaga shakhsiyeed hay'ado ganacsi.
Waxa aan u ogolaanayaa Ohio SBDC inay siiso macluumaadka la xidhiidha la taliye(yaasha) maamulka ee la qoondeeyey.
Waxa kale oo aan fahansanahay in la taliye(yaashu) ay ogol yihiin in aanay: 1)soo jeedin alaab iyo adeegyo in laga iibsado khayraad isaga/iyada uu la wadaago dan, oo 2) aqbalin wax fii ah ama komishan ah oo ku yimaad xidhiidhkan la talinta. Iyada oo la tixgelinayo la taliye(yaashu) inay isiinayaan kaalmo maamul ama farsameed, waxa aan ka tanaasulayaa dhammaan cabashooyinka ka dhanka ah shaqaalaha SBDC, iyo kuwa Shuraakooyinkeeda Khayraad iyo hay'adaha martigeliyeyaasha ah, ee ka yimaadda kaalmadan.

□ Waxa aan u ogolaanayaa Ohio SBDC, Magaalada Columbus iyo Degmada Franklin inay u adeegsadaan magacayga iyo cinwaankayga xog-ururinada iyo boos ku dirista macluumaadka la xidhiidha alaabaha iyo adeegyada. **(Tani waa ikhtiyaari)**

0 Waxa aan ogolahay waxa sare. **Codsaduhu kuma socon karo codsiga isaga oo aan calaamadin sanduuqa ogolaanshaha.**

***Macmiilka Saxeexa**________________________________________ **Taariikhda**___________________

FOR REFERENCE ONLY

## Macluumaad iyo Dhukumentiyo Loo Baahan Yahay oo Dheeraad ah

***Tirada Xubnaha Qoyska ee Ku Tiirsanayaasha ah oo aad ku jirto Laftaadu** ____________________

Dadka deggan cinwaanka gurigaaga, oo ay ku jraan xaaska iyo ku tiirsanayaasha mulkiilaha ganacsigu

***Haddii ganacsigaaga saldhigiisu uu yahay Magaalada Columbus, ma uga diiwaangashan yahay Magaalada Columbus cashuuraha ganacsiyeed awgood?**

□ Haa □ Maya □ Ganacsigayga saldhigiisu ma aha Magaalada Columbus

Haddii ganacsigaaga saldhigiisu uu yahay Magaalada Columbus, waa inaad diiwaangashan tahay si aad ugu qalanto deeqda Barnaamijkan oo "Marka aad Hoggaansatana" HADDII LAGU ANSIXIYO, TILMAAMO DHEERAAD AH AYAA LAGU SIIN DOONAA

***Miyaa ganacsigaaga ay imika ahaan ku leedahay cashuuro ama ganaaxyo ganacsiyeed / shakhsiyeed oo aanad weli bixin Magaalada Columbus?**

□ Haa 0 □ Ganacsigayga saldhigiisu ma aha Magaalada Columbus

HADDII LA ANSIXIYO, TILMAAMO DHEERAAD AH AYAA LA BIXIN DOONAA

### DHUKUMENTIYADA LA DIRAYO

Fadlan dir dhukumentiyada, haddii aad la kulanto adayg/dhibaatooyin riix gudbi. Codsigaaga waxa loo qoondeyn doonaa Shuraakadaada Codsiga

### DHUKUMENTIYADA AQOONSIGA:

| | |
|---|---|
| Tan waa loo baahan doonaa | Dir Liisanka Darawalnimo ee Gobolka, ogolaashada ama Baasaboorka |
| Tan waa loo baahan doonaa haddii ganacsigaagu ka diiwaangashan yahay Gobolka Ohio | Dir shahaadada Diiwaangelinta Ganacsiga Gobolka Ohio |

### DHUKUMENTIYADA DAKHLIGA QOYSKA

| | | |
|---|---|---|
| Dakhliga Guud ee Wax Laga Beddelay (AGI) sida lagu sheegay Cashuur Celinta Shakhsiyeed ee 2020 | $ | Dir Cashuur Celinta Shakhsiyeed ee 2020<br>Fadlan geli Dakhligaaga Guud ee Wax Laga Beddelay ee Laynka 11 ee Foomka Federaalka ee 1040 |

### DHUKUMENTIYADA DHAQAALE EE GANACSIGA

**Dir dhukumentiyada ikhtiyaarka aad dooratay si aad u xaqiijiso hoos u dhac 25% ah in uu ku yimid iibka.**

**Cashuur Celinta Iibka Ganacsiga Guud sida lagu sheegay Cashuur Celinta Ganacsiga ee 2019** ____________________

Fadlan geli Iibka Ganacsigaaga Guud Laynka 1a ee Foomka Federaalka ee 1120 M-1, ama Laynka 1 ee Jadwalka C ee Foomka 1040

Dir Cashuur Celinta Ganacsi ee Federaalka ee 2019

**Cashuur Celinta Iibka Ganacsiga ee Guud sida lagu sheegay Cashuur Celinta Ganacsiga ee 2020** ____________________

Fadlan geli Iibka Ganacsigaaga Guud Laynka 1a ee Foomka Federaalka ee 1120 M-1, ama Laynka 1 ee Jadwalka C ee Foomka 1040

Dir Cashuur Celinta Ganacsi ee Federaalka ee 2020

**Cashuur Celinta Iibka Ganacsiga ee Guud sida lagu sheegay Cashuur Celinta Ganacsi ee 2021 ama Bayaanka Macaashka iyo Khasaaraha ee 2021 ee YTD** ____________________

Fadlan geli Iibka Ganacsigaaga Guud Laynka 1a ee Foomka Federaalka ee 1120 M-1, ama Laynka 1 ee Jadwalka C ee Foomka 1040

Dir Cashuur Celinta Ganacsi ee Federaalka ee 2021 ama YTD P/L

**Bayaanka Bangiga ee Xaddiga Iibka / Helitaanka ee Abriil 2019** ____________________

Xaddigan la sheegay waa inay ugu yaraan la mid noqoto dhigaalka billaha ah ee bayaanka bangiga

Dir Bayaanka Bangiga ee Ganacsi ee Abriil 2019-dhammaan bogagga

**Bayaanka Bangiga ee Xaddiga Iibka / Helitaanka ee Abriil 2020** ____________________

Tan waxa loo adeegsan doonaa in lagu xaqiijiyo shaqaalaha W-2 iyo xaddiga shaqaalaha laga bilaabo wakhtiga codsiga

Dir Bayaanka Bangiga ee Ganacsi ee Abriil 2020-dhammaan bogagga

**Bayaanka Bangiga ee Xaddiga Iibka / Helitaanka Abriil 2021**

Dir Bayaanka Bangiga ee Ganacsi ee Abriil 2021-dhammaan bogagga

FOR REFERENCE ONLY

**Diiwaanka Mushaharka laga bilaabo Wakhtiga Codsiga - Ma khuseeyo ganacsiga aan lahayn shaqaale W2 leh**

**Tan waxa loo adeegsan doonaa in lagu xaqiijiyo shaqaalaha W-2 iyo xaddiga shaqaalaha laga bilaabo wakhtiga codsiga**

**Dir Diiwaanka Mushaharka ee Ugu Dambeeyey**

## DEEQ $10,000 AH OO DHEERAAD AH OO LOOGU TALAGALAY SHAQOOYINKA LASOO CELIYEY AMA LA ABUURAY

**Ma daneynaysaa $10K oo dheeraad ah. Fadlan buuxi qaybtan keliya haddii aad hore u muujisay inaad dib u soo celin doonto/dib u shaqaalaysiin doonto ugu yaraan 1 shaqaale oo W-2 leh oo wakhti dhamaystiran oo cusub, 2 bilood gudahood marka la helo maalgelinta, kaas oo aad awood u yeelan doonto inaad haysato muddo 4 bilood ah kadib marka aad shaqaaleysiiso. Haddii aad kaalmo uga baahan tahay macluumaadkan, Shuraakadaada Codsiga ee laguu qoondeeyey ayaa ku caawin doona. Si aad ugu qalanto maalgelin dheeraad ah, tirada Shaqaalaha COVID ka Kahor waa inay ugu yaraan 1 ka badnaadaan tirada Shaqaalaha ee dhammaadka 2021**

**Tirada Shaqaalaha ee COVID Kahor:**

Dir diiwaanka Mushaharka adiga oo kasoo bilaabaya Saddex-biloodkii 4 aad ee 2019 ama Saddex-biloodkii 1 aad ee 2020

**Tan waxa loo adeegsan doonaa in lagu xaqiijiyo tirada shaqaalaha W-2 leh ee COVID Kahor iyo u qalmitaanka deeqda $10,000 ee dheeraadka ah**

**Tirada Shaqaalaha ee Dhammaadka 2021**

**Tan waxa loo adeegsan doonaa in lagu xaqiijiyo tirada shaqooyinka ah ee la khasaaray.**

Dir Diiwaanka Mushaharka ee Saddex-biloodkii 4 aad ee 2021

FOR REFERENCE ONLY